

Rotavirus

Macluumaadka tallaalka

Rotaviruska

Rotaviruska wuxuu keenaa nooc infagshan daran ah ee gastroenteritis. Dadka qaarkiis ma muujiyaan wax astaamo ah, hase ahaatee carruurta aadka u yaryar waxay badanaa tahay inay muujiyaan astaamo daran oo u dhaxeeyaa shubanka meel-dhexaad ah ilaa shuban biyo-bax leh oo nafta halis ku ah kaas oo u baahda jifis isbtiaal wuxuuna horseedi karaa dhimasho.

Barnaamijka tallaalka rotaviruska ee qaraneed wuxuu bilowdey 2007 waxaana lagu qiyaasay tirada isbitaalka la seexiyey inay hoos u dhacday in ka badan 7,000 sanad kasta. Kuwa taga isbitaalka badanaa wax yar ayuu saameeyaa.

Waxaad tallaalka ku yarayn kartaa halista infagshanka rotaviruska ee ilmahaaga. Dhammaan carruurta waa inay qaataan tallaalka. Haddii aan laga tallaalin, waxay qaadi karaan rotaviruska haddii cuntadooda, biyaha ama gacmahooda ay ku wasaqaysan yihiin saxarada qofka cudurka qaba.

Dhibaatooyinka dhici kara oo daran ama dareen-celiska aleerjikada ee tallaalka waa kuwo dhif ah. Haddii aad ka dareensan tahay wax ku saabsan dareen-celiska ilmahaaga ee tallaalka, si degdeg ah u arag dhqtarkaaga.

Tallaalka looga hortago rotaviruska

Ka-hortagga rotaviruska waxaa la helaa asagoo lacag la'aan ah oo hoos yimaada Jadwalka Barnaamijka Tallaalka ee Qaran. Halkan Victoria, tallaalka looga hortago rotaviruska waa u lacag la'aan cunugyada, waxaana laga siyyaa afka oo laba dhoos ah marka uu jiro da'da laba iyo afar bilood. Dhooska kowaad waa in la qaataa waqtiga cunugyadu ay jiraan da'da 14 asbuuc iyo lix beri dhooska labaadna waa in la qaataa 24 asbuuc iyo lix beri.

Tallaalku kama hortago noocyada kale ee shubanka, hase ahaatee waxay yareysaa halista shubanka nolosha halista gelinaya oo uu sababo rotaviruska.

Hubinta Tallaalka hortiisa ah

Kahor intaan la qaadan tallaalka, usheeg dhaqtarkaaga ama kalkaaliyahaaga haddii cunugaagu:

- uu ka weyn yahay da'da lagu taliyey ee labada dhoosba.
- uu xanuunsan yahay (heerkulka ka sarreeyo 38.5°C)
- uu ka qabo dareen-celis daran ee tallaalka
- uu ka qabo aleerjiko daran oo wax kasta ah
- uu qabo intussusception ama waxaan caadi ahayn oo lagu dhashay taas oo horseedi karta intussusception
- uu qaadanayo daawada steroidka
- uu qaatay dhiig ku-shubis ama waxyaalo dhiig ah
- uu qabo difaaca hooseeya oo ay ugu wacan tahay nuqsaanta nadaamka difaaca, xaaladaha dhiigga oo aan caadi ahayn ama khakhal, kansar, HIV ama daawooyinka qaarkood
- haddii cid qoyskaaga ka mid ah ay qabto difaaca hooseeya.

Dhibaatooyinka kale ee dhici kara ee tallaalka rotaviruska

Tallaalka looga hortago rotaviruska waa mid waxtar leh oo ammaan ah in kastoo dhammaan daawooyinka oo dhami ay yeelan karaan dhibaatooyin kale oo dhici kara.

Dhibaatooyinka kale oo dhici kara:

- saxarada cunugyada qaarkood waxaa ku jiri kara rotaviruska tallaalka ka dib – gacmaha oo aad loo dhaqo ka dib baddelka naabiyada waa wax mar kasta lagu talinayo iyo in dadka leh difaaca hoose ay ka dheeraadaan naabiyada wasaqaysan inta lagu jiro waqtigan.

Dhibaatooyinka kale ee dhici kara oo dhifka ah ee tallaalka

Waxaa jira halisyo yaryar oo dareen-celiska aleerjikada oo daran (anaphylaxis) ee tallaalka. Tani waa sababta laguula talaiyey inaad joogto killinikada ana seerjariga caafimaadka ugu yaraan 15 daqiiqo ka dib tallaalka xagga daaweyn dheeraad ah haddii loo baahdo.

Intussusception (awdan uu sababo hal qayb ee wamadka oo u riixmaysa dhinac kale ee walamadka sida gobolo taliskoob ah) ayaa dhici kara (marmar dhif ah) ee cunugyada ee saddex asbuuc kadib helidda dhooska kowaad ama labaad ee tallaalka rotaviruska. Calaamadaha in cunugu qabo intussusception waxaa ka mid ah:

- ku-soo-boodid oohinta
- muuqaal ciiro ah
- usoo-riixidda lugaha xagga caloosha.

Daraasadaha dhawaan oo laga sameeyey Australia iyo dibadda waxay muujinayaan inuu jiro xoogaa korodh ah ee halista intussusception ee cunugyada ee saddexda asbuuc ee kowaad kadib helidda dhooska kowaad ama labaad ee tallaalka rotaviruska. Halistu ugu dhawaan waa lix kays intussusception oo dheeraad ah ee 100,000 muluqyo oo la tallaalay ama 14 cunugyo dheeraad ah sannadkii oo qaadanaya intussusception halkan Australia.

Halka caawimaadda laga helo

- Dhaqtarkaaga
- Adeegga tallaalka ee dowladda hoose ee degaankaaga
- Janalka Caafimaadka Wacan <https://www.betterhealth.vic.gov.au/health/healthyliving/rotavirus-immunisation>

Si aad u hesho daabacaadan qaab lagu heli karo ka wac 1300 882 008, adoo adeegsanaya Adeegga Relay ee Qaranka 13 36 77 haddii loo baahdo, ama email u dir immunisation@dhhs.vic.gov.au

Waxa idmay oo daabacay Dowladda Victoria, 1 Treasury Place, Melbourne.

© Dowlad-goboleedka Victoria, Wasaaradda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha Juun 2017.